



Reimagining Education During the Pandemic

**PORTLAND  
PUBLIC SCHOOLS**



## **Xusuusin: Wakhtiga Kama Dambaysta ah ee Xog-ururinta Ikhtiyaarka Isku dhafka ee K-5 Waxa Loo Kordhiyey illaa Febraayo 25**

Febraayo 19, 2021

Qoysaska PPS ee Sharafta leh,

Sidii aanu [wadaagnay toddobaadkii hore](#), waxa aanu sii wadaynaa inaanu siino fursado waxbarasho oo fool ka fool ah oo la kordhiyey ardayda, oo uu la socdo yool ah in loo bilaabo waxdhigis isku dhaf ah ardayda xanaanada illaa fasalka shanaad Abriil gudaheeda. Waxyaalihii u dambeeyey ayaanu kuu haynaa adiga toddobaadkan:

- Waxa aanu u kordhinay wakhtiga kama dambaysta ah ee jawaabta xog-ururinta *Qaabka Waxbarashada ee Haaf Teeramka 4 aad* Qoysaska K-5. Xog-ururintu waxa ay qoysaska siinaysaa fursad aad nagu ogaysiiso haddii aad doorbidayso ardaygaagu in uu ka qaybqaato waxbarashada isku dhafka ah ama in uu ku nagaado Waxbarashada Onlaynka ah ee Dhammaystiran (CDL). Xog-ururintu waxa ay ahaan doontaa mid **furan illaa Khamiista, Febraayo 25**.
- Haddii aanad hore u helin xog-ururinta, ama haddii aad taageero uga baahan tahay buuxinteeda, fadlan u dir iimayl [research@pps.net](mailto:research@pps.net). Waxa aanu aad ugu farxi doonaa inaanu ku kaalmayno.
- Shaqaalaha PPS waxa ay taleefannada ka wici doonaan qoysaska mid midka ah, iyaga oo hubinaya inaad ka warqabto ikhtiyaaradayada diyaarka u ah iyaga sida lagu xusay xog-ururinta, taas oo bilaabmaysa toddobaadka soo socda.
- Waxa aanu soo dhignay koox ah Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo ee ku saabsan waxbarashada isku dhafka ah. Waxa aad ka heli kartaa [pps.net/hybridfaq](https://pps.net/hybridfaq). Su'aalaha iyo jawaabuhu waxa ay diyaar ku yihiin dhammaan luuqadaha aanu taageerno ee lixda ah.

Waxa aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan tallaabooyinka caafimaadka iyo badbaadada ee aanu qaadayno si aanu u taageerno waxbarashada fool ka foolka ah, muunad jadwallada waxdhigista isku dhafka ah ee ardayga iyo wax kale oo dheeraad ah, [u soo jeedintayada Guddiga Waxbarashada](#) Febraayo 9.

Waxa aanu u rajaynaynaa dhammaan qoysaska PPS nabadgelyo inta ka hadhsan toddobaadka iyada oo bulshadeenu kasoo kabanayso caqabad kale oo ka dhalatay duufaantii jiilaalka ee dhammaadkii todobaadkii hore. Waxa aanu sii wadi doonaa inaanu ku siino cusboonaysiin joogto ah inta aanu kusii dhawaanayno ka bilaabitaanka waxdhigista isku dhafka ah PPS.

Mahadsanid.